

Ku Coddeynta Maqnaanshaha

Waxa aad sameynayso iyo Waxa aanad sameynayn

Samee: **Saxeex gadaasha baqshadda lagu soo celinayo warqada cod-bixinta.**
Codkaaga lama tirin doono haddii la waayo saxeex u dhigma midka kaaga diiwaangashan karraanigaagu.

Samee: **Soo dir warqadaada codbixinta kahor Julaay 18**
Haddii aad ku soo dirayso boostada halkii aad gacanta ku keeni lahayd warqada cod-bixinta, u samee sidaas sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah ka hana soo dirin laba toddobaad gudahood kahor doorashada Agoosto 2.

Samee: **Raad raac warqadaada cod-bixinta.**
Booqo Michigan.gov/Vote si aad u hubiso in la aqbalay. Haddii aan la aqbalin, si degdeg ah u la xiriir karraanigaaga.

Samee: **Ogow in dhammaan warqadaha codbixinta maqnaanshaha ee saxda ah ay tirin doonaan lammaane laba xisbi ah oo shaqaale doorasho ah.**

Ha sameyn: **Ha soo dirin warqadaada codbixinta Kadib Julaay 18.**
Si aad uga foggaato daahitaanka boostada, gacanta ku gaarsii xafiiska karraanigaaga ama sanduuqa cod-bixinta. Ku dir boostada warqadaada cod-bixinta kaliya haddii ay lagama maarmaan tahay.

Ha sameyn: **Ha ka codsan qof inuu kuu qaado warqadaada codbixinta ilaa ay yihiin qaraabo ama xubin qoyskaaga ka tirsan.**

Coddeynta Maqnaanshaha ee Hore

Hore ugu codee warqada cod-bixinta maqnaanshaha si shakhsi ahaana xafiiska karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga ilaa 4 p.m. ee maalinta ka horeysa doorashada.

Karraaniyiinta ayaa bilaabaya tirinta codadka maqnaanshaha maalinta doorashada.

Soo sheeg wixii handadaad, dhibaataayn iyo qasbid ah ee loo gaysto cod-bixiyaha ee aad aragto. Ogeysii shaqaalaha doorashada ama la xidhiidh khadka ilaalinta doorashada ee aan xisbiyada ahayn **866-OUR-VOTE**.

Si aad u hesho macluumaadka cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE

Coddeynta Milatariga ee Dibadda

Dadka ka hawl-gudanaya dibaddu waa inay awood u yeeshaan inay si buuxda uga qeybqaataan dimuqraadiyadeena iyada oo aan la kulmin caqabado ama carqalado waaweyn. Adeegyo gaarka ah ayaa hadda la bixiyaa si ay ugu caawiyaan cod-bixiyayaasha milatariga ah ka qeybqaadashada doorashada. Waxaa socda dedaalo cusub oo lagu doonayo in xitaa cod-bixinta loo sii fududeeyo dadka u adeegaya dalkeena.

Is diiwaangeli si aad u coddeyso

Iska diiwaangeli ama hubi marxaladda ay marayso diiwaangelintaada cod-bixintu Michigan.gov/Vote.

- Waxa kale oo aad is diiwaangelin kartaa adiga oo soo **dejisanaya oo buuxinaya** Codsiga Kaadhka Boostada ee Federaalka (FPCA) ee Barnaamijka Caawinta Cod-bixinta ee Federaalka ee laga heli karo barta **FVAP.gov**

Codso warqaddaada cod-bixinta

Codso warqada cod-bixinta maqnaanshaha in laguugu soo diro iimeyl, fakis ama boostada caadiga ah.

- **Ka soo dejsa** FPCA barta **FVAP.gov**.
 - ✓ **Buuxi** oo calaamadi sanduuqa si aad u muujiso qaabka aad u rabto inaad hesho warqada codbixinta.
 - ✓ **Ugu gudbi FPCA** karraaniga deegaankaaga boostada, fakiska ama iimeylka.
- **Booqo** Michigan.gov/Vote si aad u hubiso marxalada ay marayso warqadaada cod-bixinta ee aad codsatay iyo si aad u aragto warqadaada doorashada kahor wakhtiga.

Si DEGDEG ah ugu dir boostada warqada codbixinta ee aaddhammaystirtay

Ugu soo celi warqada cod-bixinta boostada caadiga ah sida ugu dhakhsaha badan si loo helo Maalinta Doorashada.

Waa inaan wax badan qabanaa

Xoghayaha Gobolka Michigan Jocelyn Benson waxay soo jeedinaysaa tallaabo sharci ah si loo xaqiijiyo in la tiriyo codadka xubnaha adeegga iyo qoysaskooda iyo inay helaan cod-bixin ku habboon, oo ammaan ah.

Waxay sii waddaa inay u doodo in loo oggolaado xubnaha millatariga ee ka hawlgala dibadda iyo lamaanayaashooduba inay si ammaan ah **ugu soo celiyaan warqadooda cod-bixinta qaab elektaroonig ah**.

Ku dar codkaaga wada hadalka adigoo iimeylka ugu soo diraya ra'yi-celintaada Secretary@Michigan.gov.

Si aad u hesho macluumaadka
cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE

Booqo Michigan.gov/VOTE

Ishaada macluumaadka doorashada Michigan ee la shakhsiyeeyay

- ✓ Is diiwaangeli si aad u coddeyso
- ✓ Xaqiiji marxlada diiwaangelinta codbixiyaha
- ✓ Codso warqada cod-bixinta maqnaanshaha
- ✓ Hel karraanigaaga
- ✓ Eeg muunadda warqadda cod-bixinta
- ✓ Raad raac warqadaada cod-bixinta maqnaanshaha
- ✓ Hel sanduuqa lagu rido cod-bixinta ee deegaankaaga doorashada
- ✓ Hel goobtaada cod-bixinta

Ka coddeynta Goobaha Cod-bixinta

Waxa aad sameynayso iyo Waxa aanad sameynayn

Samee: **Hubi diiwaangelintaada oo ka raadi goobtaada cod-bixinta barta Michigan.gov/Vote.** Haddii diiwaangelintaadu ay dhacsan tahay, si degdeg ah u booqo xafiiska karraanigaaga adigoo sita caddeynta degaanshaha.

Samee: **Soo qaado aqoonsi sawir leh.** Haddii aanad haysan aqoonsi sawir leh, waxaad u baahan doontaa inaad saxeexo bayaan ka hor inta aanad coddeyn.

Samee: **Codso adeegsiga Taarminalka Caawinta Cod-bixiyaha.** haddii aad naafo tahay ama aad doorbidayso inaad adeegsato.

Samee: **Ilaali qarsoodinimada warqaddaada cod-bixinta.** Ku hay warqada cod-bixinta galka qarinta, marka laga reebo marka aad coddeynayso, kadibna ilaa wakhtiga aad ku ridayso cod-tiriyaha.

Ha sameyn: **Ha la hadlin qof kasta oo ku yiraahda waxaan ahay kormeere cod-bixin ama loollame.** Looma oggola inay la hadlaan cod-bixiyayaasha. Isla markaaba u sheeg xadgudubyada shaqaalaha doorashada.

Ha sameyn: **Ha ka tagin goobta cod-bixinta adigoo coddeyn.** Sharcigu wuxuu farayaa in qof kasta oo safka ku jira 8 p.m. in loo oggolaado inuu coddeeyo.


Ha sameyn: **Ha u oggolaan inuu qof kale kuu coddeeyo.** Waa warqadaadii cod-bixinta waana inaad adigu ku ridaa cod-tiriyaha.

Soo sheeg wixii handadaad, dhibaataayn iyo qasbid ah ee loo gaysto cod-bixiyaha ee aad aragto.


Ogeysii shaqaalaha doorashada ama la xidhiidh khadka ilaalinta doorashada ee aan xisbiyada ahayn **866-OUR-VOTE.**

Si aad u hesho macluumaadka cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE



Muwaadiniinta Xabsi Soo Maray



Waad coddeyn kartaa!

Haddii aad tahay ugu yaraan 18 jir, muwaadin Mareykan ah oo degan Michigan, **waad coddeyn kartaa.**

Haddii aad leedahay dembi xukun hore ah, **waad coddeyn kartaa.**

Haddii aad ku jirto sii-deynta sharafeed, **waad coddeyn kartaa.**

Haddii aad ku jirto sii dayn tijaabin ah, **waad coddeyn kartaa.**

Haddii aad xabsiga ku jirto ama ka baxsan tahay oo aad sugayso in lagu xukumo, **waad coddeyn kartaa.**

Haddii aad dhawaan heshay ama aad dib u cusboonaysiisay aqoonsiga Michigan ama shatiga darawalnimada, **waxaad u diiwaangashan tahay inaad coddeyso** ilaa aad dooratay in aanad sidaas sameyn mooyee.

Haddii doorashada xigtaa ay tahay wax ka yar laba toddobaad laga bilaabo taariikhda aad heshay ama aad cusboonaysiisay shatiga, waa inaad la tagtaa xafiiska karraaniga deegaankaaga waraaqo dheeraad ah si aad u coddeyso doorashadaas.

Si aad u hesho macluumaadka
cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE

Michigan waxay leedahay Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha ee Isla-maalin kaas ah

Hadda waxaad isku diiwaangein kartaa si aad u coddeyso
ilaa iyo xataa Maalinta Doorashada

Sidee ayaan isku diiwaangeliyaa maalinta doorashada?



Haddii aanad diiwaangashaneyn oo aad rabto inaad coddeyso Salaasada, Agoosto 2, waa inaad si fool-ka-fool ah iskaga diiwaangelisaa xafiiska karraaniga magaalada ama deegaankaaga ugu dambeyn 8 p.m. Isdiiwaangelinta kadib, waxaad ku coddeyn kartaa maqnaanshaha warqada cod-bixinta inta aad joogto xafiiska karraaniga.


Waxa ay tahay inaad la timaado...



OO QAADO CADDEYN TA DEGNAANSHAHA xafiiska karraaniga magaalada ama deegaankaaga (nuqullada dhijitaalka ah waa la aqbali karaa) sida:

- *Shatiga darawalnimada Michigan ama kaarka aqoonsiga gobolka Biilka*
- *Bayaanka bangiga*
- *Diiwaanada kulliyada ama jaamacada*
- *Jeegaga mushaharka 3ama jeega dawladda*
- *Dukumenti kale oo ka soo baxay dawladda*

Yaa isdiiwaangelin kara si uu u coddeeyo?



Waa inaad:

- Ahaataa qof degan Michigan (wakhtiga aad is diiwaangelinayso) waana inaad tahay qof degan magaalada ama deegaankaaga ugu yaraan 30 maalmood (marka aad coddeyso)
- Ahaataa Muwaadin Mareykan ah
- Tahay ugu yaraan 18 sanno jir (marka aad coddeynayso)
- Aanad hadda ku jirin xukun xabsi ama jeel ah

Si aad u hesho macluumaadka
cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE

DHIIBO CODKAAGA

KA SOO CODEEGURIGA DOORASHADA OGOSTO 2

Codso warqadaada cod-bixinta adigoo guriga jooga



Waxaa lagu tallinayaa: Iskaga diwaangeli boostada/onlayn barta Michigan.gov/Vote ilaa Julaaay18.

Haddii loo baahdo, diiwaangelinta waxaa la heli karaa iyadoo loo keenayo caddeynta degaanshaha xafiiska karraaniga ee deegaankaaga ilaa iyo Maalinta Doorashada.

Ka soo codee guriga



Codso ama kala soo deg arjiga Michigan.gov/Vote. Codsiiyo si fudud loo heli karo ayaa sidoo kale la heli karaa. Ama waxaad arji ka codsan kartaa karraaniga deegaankaaga.

Waxaa lagu tallinayaa: Isdiiwaangeli si aad si otomaatig ah ugu hesho arjiga cod-bixinta ee guriga doorasho kasta.

Soo celi warqadaada cod-bixinta



Booqo Michigan.gov/Vote si aad u hesho macluumaadka cod-bixinta ee la shakhsiyeeyay. Dhamaan warqadaha cod-bixinta maqnaanshaha ee ansaxa ah ee leh saxeex u dhigma ka qofka u diiwaangashan ee uu helay karraaniga degaanka cod-bixiyahu kahor 8 p.m. ee Salaasada, **Ogosto 2**, ayaa la tirin doonaa.

Ku soo celi warqadaada cod-bixinta **sanduuqa lagu rido** (haddii karraaniga deegaankaagu uu mid leeyahay) ama si caadi ah u keen **xafiiska karraanigaaga**. Marka hore wac si aad u hesho goobta iyo saacadaha. Ama ugu soo celi warqadaada cod-bixinta **boostada** sida ugu dhakhsaha badan iyo ugu yaraan laba toddobaad ka hor Maalinta Doorashada.

Si aad u hesho macluumaadka
cod-bixiyaha ee la shakhsiyeeyay booqo:

Michigan.gov/VOTE